One91 Waxbarashada Bulshada
Buug-gacmeedka Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha





Updated Feb 2022/SK/jg

# TUSMADA

Tusmada……………………………….……………….2
Bayaanka Howlgalka iyo Guudmarka Barnaamijka…………...3
Goobaha, Xiriirada, Saacadaha. ... …………… 4
Macluumaadka Diiwagalinta …………………..………… 5
Heerarka ……………………………………...............6
Bixinta, Dhibcaha Imaanshiyaha, iyo Saaris ………….............7
Habka Imaanshaha iyo Wadahadalka……..…….. 8
Manhajka……………………………………..............9
Tilmaamaha Habdhaqanka……………………………………10
Caafimaadka iyo Badqabka ……………………..………………..12
Cimilada Xun, Xiritaanka Dugsiga ……………………15

# Himiladayada

## Arday Kasta. Mustaqbal Diyaar ah.

Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 , (Mashruuca KIDS iyo Club Nicollet), waxa ay bixiyaan barnaamijyo tayo sare leh dugsiga kahor iyo kadib waxana loogu talagalay carruurta dhigata Fasalka Xannaanada ilaa Fasalka 8aad. Waxqabadyo kala duwan oo waxbarasho, madadaalo, iyo horumarin ah ayaa la siiyaa kuwaas oo ka caawiya ardayda in ay noqdaan kuwo iskood isku-haga oo isku-edbiya. Iyada oo loo marayo deegaan ku dhisan daryeel iyo taageero bulsho ama damqasho, shaqaaluhu waxa ay ka caawiyaan arday kasta inuu u muujiyo ixtiraam fikradahooda iyo kuwa kale.

## GUUDMARKA BARNAAMIJKA

Cilmi baaris ayaa muujisay in tayada barnaamijyada dugsiga kahor iyo kadib ay ilaaliso bedqabka carruurta, caawiso qoysaska shaqeeya, kor u qaaado imaatinka dugsiga oo taagerto ku guuleysiga tacliinta.

Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay bixiyaan barnaamij ku saleysan xulasho halkaas oo manhajku uu ku saleysan yahay baahiyaha iyo danaha carruurta ka diiwaangashan.

Carruurtu waxa ay fursad u leeyihiin in ay ku tababbartaan xirfadaha hoggaaminta dhallinyarada oo ay sameeyan talo-bixino ku saabsan barnaamijyada maalinlaha ah. U oggolaanshaha carruurta inay kaqeybqaataan habkaan waxa ay raacdaa waxqabadka ugu fiican, waxa ay gacan ka geysataa horumarinta madax-bannaanida iyadoo kobcineysa bulshada isla markaana carruurta ka dhigaysa qaar xidhiidh la sameeya deegaankooda.

Xubnaha daryeelka iyo kuwa waxbaristu waxa ay bixiyaan jawi xiiso leh, jawi kobcin ah waxa ayna siiyaan taageerada ay carruurtu u baahan yihiin si ay u dareemaan in la jecel yahay, in ay bedqabaan iyo in ay meel ka tirsan yihiin. Ha noqoto wadahadal, caawimaada layliska guriga ama tilmaamid, hadafkeennu waa inaan hubinno guusha carruurta bulshadeena iyada oo la abuurayo xiriir wanaagsan, la bixinayo waxqabadyo waxbarasho iyo madadaalo iyo in carruurta la siiyo fursado ay kaga hadlaan fikradahooda oo ay dareemaan in ay qiimo leeyihiin.

## XIDHIIDHKA, SAACADAHA, GOOBAHA



Updated Feb 2022/SK/jg

Daryeelka Da'da Dugsiga ee Fasalada Xannaanada-5
Dugsi Hoose kasta oo ISD 191 waxa uu bixiyaa daryeel kahor iyo kadib dugsiga.

Isniinta ilaa Jimcaha
7- 9:05 am iyo
2:55 - 5:30 pm

## XIRIIRADA

Shar Lattery
slattery@isd191.org

Edward Neill
13409 Upton Ave, Burnsville 55337
952-707-3108

Harriet Bishop
4404 O'Connell Rd, Savage 55378
952-707-3908

Martha Dudley
mdudley@isd191.org

Hidden Valley
13875 Glendale Rd, Savage 55378
952-707-3808

Vista View
13109 County Rd 5, Burnsville 55337
952-707-3408

Stacey Konopa
skonopa@isd191.org

Gideon Pond
613 E 130th St, Burnsville 55337
952-707-3008

Sky Oaks
100 E 134th St, Burnsville 55337
952-707-3808

Jeanine Kristjanson
jkristjanson@isd191.org

Rahn 4424 Sandstone Dr, Eagan 55122
952-707-3608

William Byrne
11608 River Hills Dr, Burnsville 55337
952-707-3508

## MACLUUMAADKA DIIWAANGELIN

Dhammaan carruurtu waa inay isdiiwaangeliyaan si ay uga qeyb galaan Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91.
Diiwaangelinta waxaa loo tixgelin doonaa in ay dhameystiran tahay marka kuwan soo socda la helo:

- Foomka diiwaangelinta oo la soo raaciyay $25 oo ah khidmadda diiwaangelinta ilmo kasta ($70 ugu badnaan qoyskiba)
- Foomka Macluumaadka Ilmaha oo dhameystiran
- Heshiis Saxeexan
- Foomka Tilmaamaha oo Saxeexan

Halkan guji si aad u hesho foomamka.
Sug ugu yaraan saddex (3) maalmood oo shaqo qabasho ah si loo dhamaystiro. Lacagta diiwaangelinta lama soo celin karo.

Qoysasku waa inay isdiiwaangeliyaan sanad dugsiyeed kasta iyo xagaaga Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91.
Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay xaq u leeyihiin in ay dib u dhigaan diiwaangelinta haddi ay timaado baahi loo qabo kordhinta shaqaalaha. Barnaamijku wuxuu kaloo xaq u leeyahay inuu diido ama xaddido adeegga sababtuna tahay lacag-bixin hore oo aan la bixin awgeed.

Caruurta leh Baahiyaha Gaarka ah
Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 ayaa aqbali karta carruurta leh baahiyaha gaarka ah.
Isuduwayaasha Barnaamijka waxa ay la kulmi doonaan waalidiinta diiwaangelinta kahor si looga wada hadlo daryeelka iyo ilaalada ilmahaaga. Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay xaq u leedaha in ay diido ama joojiso adeegyada daryeelka ilmaha haddii ka-qaybgalka noocan ahi uu keeno caqabad weyn ama wax ka beddelka lagu sameeyo qaabka barnaamijka.

HESHIISYADA IYO ISBEDDELADA HESHIISKA
Dhammaan qoysaska waxaa looga baahan yahay in ay u buuxiyaan Heshiiska Barnaamijka canug walba.
Isbedelada heshiiska waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ugu danbayn 25-ka bisha ama heshiiski asalka ah wuxuu sii socon doonaa bisha xigta. $20 lacag ah ayaa loo qiimeeyaa isbeddelada lagu sameeyo heshiisyada qoyska.

**Registration Fee**
All children will be charged a $25 registration fee upon acceptance (maximum registration fee of $75 per family).

**Daily Summer Rates 7:00 AM – 5:30 PM**

| | First Child | Sibling |
|---|---|---|
| 14-21 days per month | $42 | $41 |
| 8-13 days per month | $46 | $45 |
| 1-7 days per month | $50 | $49 |

Parents provide transportation to and from child care – no busing option.

**Half Day Rates**

| | |
|---|---|
| Half day (7-12:30 or 12:30-5:30) | $32 per day |
| Half day Drop-In (7-12:30 or 12:30-5:30) | $34 per day |

**No sibling rate

Parents provide transportation to and from child care – no busing option.

**After In-Person Summer School**
3:15-5:30 $12.00
**No sibling rate
**Bus transportation from summer school location to Child Care/Project KIDS provided by Summer School Administration**
Please be sure to notify summer school staff of your child's need for busing to Sky Oaks or Neill elementary after summer school.

**Jumpstart Kindergarten Wrap Around Care**

| | | |
|---|---|---|
| AM Care | 7:00 AM - 9:00 AM | $14.00 |
| PM Care | 2:30 PM - 5:30 PM | $13.00 |

Parents provide transportation to and from child care – no busing option.
This care is only available during the days Jumpstart Kindergarten is in session.

**GTI Wrap Around Care**

| | | |
|---|---|---|
| AM Care | 7:00 AM – 9:00 AM | $13.00 |
| PM Care | 4:00 PM – 5:30 PM | $12.00 |

Parents provide transportation to and from child care – no busing option.
This care is only available during the days GTI is in session at Sky Oaks Elementary.
*If care is needed for any other time, costs are reflective of the Fees listed under Daily Summer Rate and Half Day Rates above

**Valleyfair 2022 Season Gold Pass**
Limited number available. Summer Break field trips to Valleyfair (excluding Soak City) will be provided, weather permitting, to participants owning a pass various weeks throughout the summer. Dates to be determined. Visit the Valleyfair website for information regarding the Gold Pass.

## LACAG BIXINTA, DHIBCAHA IMAANSHIYAHA, SAARIS

Koontadaada Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxaa loo arki karaa hab onlayn ah iyada oo la gelayo CommunityEd191.org.

### LACAG BIXINTA

Hababka lacag bixinta ee la aqbalo waxa ka mida Visa/MasterCard, money order iyo jeegaga qasnajiga. Jeegaga shaqsiga ah lama aqbalo si loogu bixiyo bisha. Koontooyinka oo dhami waa in faylkooda uu ku jiraa kaarka amaahda oo sax ah. Haddii aadan awoodin in aad lacagta ku bixiso qaabkan, fadlan la xiriir Isuduwaha Barnaamijka ee goobtaada. Waan aqbalnaa Caawimaada Degmada.

Lacagta bisha waxaa la bixinayaa 1da bisha.
Si otomaatig ah ayaa lacagta looga jari doona kaarka deynta ee faylka ku jira haddii ay dhacdo in bisha lacagteed lagu bixin waayo muddadeeda oo ay gaadho 25-ka bisha. Intaa waxaa dheer $25 oo ah lacag bixin daahida ayaa laga jari doonaa xisaabta.

Haddii ay dhacdo in lacagihi la soo dhaafay ee aan la bixin la awoodi kari waayo in lasoo uruuriyo, koontooyinka xisaabta ee qolyahaa lacagta bixin waayay ayaa loo diri doona Hay'adda Uruurinta Daymaha ee Transworld.
Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay xaq u leedaha in ay ka joojiso adeegyada koontooyinka aan lacagta bixinayn se laga yaabaa in ay dib u siiso daryeelka markii koontooyinkaas laga shaqaysiiyo.
Koontooyinka oo dhami waa in aan lagu lahaan wax lacag ah si adeegyada loo siiyo bisha xigta. (Lacag Bixinta iyo Jadwalka 1 (f) heshiiska)

### DHIBCAHA IMAANSHIYAHA

Dhibcaha Imaanshiyaha lama bixin doono maalmaha maqnaanshaha ama maalmaha fasaxa ee ku qoran jadwalka bilaha.

### SAARIS



Updated Feb 2022/SK/jg

Si aad uga saarto ilmahaaga barnaamijka, ogeysiis waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ahaan laba (2) toddobaad kahor maalinta ugu dambeysa ee xaadiritaanka. Haddii ogeysiiska aan la helin, laba toddobaad oo lacag-bixin ah ayaa lagaa qaadayaa.

## NIDAAMYADA SOO XAADIRIDA

### DEJIN IYO QAADIS
Dhisme kasta waxaa jira albaab/goob cayiman oo loogu tala galay in lagu dejiyo oo laga qaado caruurta. Kaliya waalidiinta iyo kuwa ku qoran foomka macluumaadka ilmaha ayaa loo oggol yahay inay qaadaan carruurta. Qof kasta oo qaadaya cunnug waa inuu u diyaar garoobaa inuu muujiyo sawir aqoonsiya oo sax ah.

### KA MAQNAANSHIYAHA BARNAAMIJYADA DARYEELKA ILMAHA EE WAXBARASHADA BULSHADA ONE91
Waalidka ayay mas'uuliyadisa tahay in ay ogeysiiyaan goobta Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 goorta uu ilmahoodu maqnaanayo. Waa in si toos ah loo wacaa goobta. Waalidiinta waa lala soo xiriiri doonaa haddii cunuggu uusan imaanin Barnaamijka marka ay tahay in uu yimaado. Haddii ilmuhu ku guuldareysto inuu yimaado wakhtigi loo qorsheeyay ama haddii waalidku ku guuldareysto inuu ogeysiiyo goobta maqnaanshahooda, $5 ayaa la qaadaa.

### HUBINTA AQOONSIGA
Si loo hubiyo bedqabka cunug walba, waalidiintu waa inay ku wargeliyaan shaqaalaha Barnaamijka qoraal haddii qof kale oo aan ahayn waalidka/ilaaliyaha uu ka soo qaadayo carruurta goobta.
Hubinta aqoonsiga waxaa sameyn doona shaqaalaha goobta jooga waqtiga cunugga la qaadayo.

### LABADA WAALID XAQ AY U LEH IN AY SOO QAADAAN
Sida waafaqsan sharciyada Minnesota, ilaa ay xaddido maxkamad sharci ahi, labada waalidba xaq bay u leeyihiin inay ka soo qaadaaan cunnugoodagoobta daryeelka. Waalidka diiwaangelinta samaynaya ee doorta in aanu ku daran waalidka   kale qofka awooda u leh in uu soo qaado cunnuga, waa inuu uso gudbiyaa goobta dukumiinti maxkamadeed oo rasmi ah .

SIYAASADA QAADISTA RAAGTA
Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay furmataa 7da subaxnimo waxa ayna xidhmataa 5:30 galabnimo.
Lacag soo daahida oo qadar ahaan dhan $10 ayaa lagu soo dallacayaa koontooyinka qoyska 15 daqiiqo kasta oo ilmaha la soo dhigo wixii ka horreysa 7 subaxnimo ama la qaado wixii ka dambeeysa 5:30 galabnimo.

Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay xaq u leedahay inay ka joojiso adeegyada haddii waalidiinta ama masuuliyiinta ay si joogto ah u soo daahaan.

## XIRIIRKA

XIRIIRKA WAALIDKA
Dhammaan waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waa inay haystaan cinwaan emayl oo hadda faylka ku jira. Inta badan xiriirka dhexmeri doona shaqaalaha iyo qoysaska waxaa lagu soo diri doonaa emayl.

FARIIMAHA TELEFOONKA IYO EMAIL
Waalidiintu way wici karaan goobta Daryeelka Ilmaha ama waxay u diri karaan email iskuduwaha goobta
markasta oo loo baahdo. Telefoonnada iyo emayllada waxaa lagu soo celin doonaa waqti habboon.

## MANHAJKA

Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay bixisaa waxqabadyo ku habboon da'da waxa ayna siiyaan fursado garasho, bulsho, shucuur, iyo koritaan jireed.

Barnaamijka Daryeelka Carruurta waxa ay raacdaa Hagaha Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (ee afka qalaad loo soo gaabiyo MDH) si loo sameeyo kala fogaanshiyaha dadka ee Dugsiyada dhexdiisa.
hagista waxa ku jirta
·Kor u qaad jawi barnaamij oo nabdoon
·Joogtee boosaska fasalka ee nabdoon iyo kala fogaanshiyaha bulshada marka ay suurogal tahay
· Xidho af-saab
·Istaraatiijiyad u yeelo waqtiyada cuntada
·Yaree fursadaha isdhexgalka kooxaha
·Dhiirigeli oo xooji caadooyinka bulshada iyo aadaabta caafimaadka
·U ololee shaybaadh caafimaad

WAXQABADYADA MANHAJKA

Carruurtu waxa ay ku raaxeysan doonaan nashaadaadyo kala duwan oo madadaalo, waxbarasho, iyo horumarin leh ugu yaraana qaab-dhismeedku noqon doono mid rasmi ah oo leh deegaan si wanaagsan loo kormeero oo raaxo ah. Carruurtu waxa ay ka qaybgalaan waayo-aragnimo kooxeedo iyo shaqsiyadeedo badan oo dhiirrigelisa horumarka jireed, aqooneed, iyo bulsho. Barnaamijku waxa uu ku dadaalayaa inuu isku dheelitiro waxqabadyada firfircoon iyo kuwa dadban. Dadaal kasta ayaa loo sameeyaa si loo bixiyo jawi nabdoon oo wax dhisi kara kaasi oo caawiya horumarinta shucuur wanaagsan.

HADAFYADA MANHAJKA

Siinta fursado si loo hormariyo anshax shaqsiyeedka. Horumarinta mas'uuliyadda qofka ficilkiisa, dejinta xadka, ixtiraamka xuquuqda iyo hantida dadka kale, sameynta saaxiibtinimo, iyo u adeegsiga hantida bulshada si masuuliyad leh.

- Si loo xoojiyo fikradaha tacliinta iyada oo loo marayo waxqabadyo waxbarasho oo gacanta laga qabanayo. Carruurtu waxa ay horumartaa kalsoonidoodu iyada oo loo marayo waayo-aragnimada nolosha dhabta ah iyo barnaamij ula kac ah lana adeegsanayo fikradaha tacliinta sida akhriska, xisaabta, sayniska, horumarinta luqadda, iyo inbadan.
- Si loo hago loona kobciyo horumarka bulshada iyo caafimaadka maskaxda.
- Si loo siiyo fursado horumarineed oo jirka ah. Carruurtu waxa ay kalsooni ku yeeshan jawiga jidh ahaaneed marka loo marayo  ciyaaraha, hiwaayadaha, iyo jimicsiga
- Si loo dhiirigaliyo xirfadaha noolaanshaha madaxbanaan iyo nolol caafimaad leh.

## TILMAAMAHA HABDHAQANKA

FILASHOOYINKA

Ujeeddada ugu weyn ee barnaamijyada Waxbarashada Bulshada ayaa ah in qof walba uu dareemo ammaan xagga shucuurta iyo jirka ah, ixtiraam iyo qaddarin.
Kaqeybgalayaasha Waxbarshada Bulshada waxa ay isticmaali doonaan dabeecad xushmad leh marwalba oo ka caawin doonta asxaabta, naftooda iyo shaqaalahoodaba inay dareemaan ammaan, ixtiraam iyo qiimeyn.

Filashooyinka aasaasiga ah ee ardayda iyo dadka waaweyn ay tahay in ay xusuustaan waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn:

1.Waan ixtiraameynaa nafteena, dadka kale iyo hantida.
2.Waxa aan u dhaqmaynaa qaab habboon.

Barnaamijyada Waxbarashada Bulshada waxay u hogaansami doonaan [Siyaasadaha Anshaxa Ardayda] oo ay aasaaseen Degmada #191; Nidaamka MSBA # 506 iyo Siyaasadaha Ardayda qeybta 500.

XEERKA ANSHAXA
Haddii cunug laga ceyriyo barnaamijka sababta oo ay tahay akhlaaqdiisa, waxay awoodaan inay ku noqdaan barnaamijka hal sano kadib markii warbixintii ugu dambeysay la xareeyay. Haddii warbixin akhlaaqeed oo kale ay dhacdo xilligan, cunugga waxaa isla markiiba laga ceyrin karaa Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91.
Haddii cunugga laga eryo maalinta dugsiga caadiga ah oo uu eryo maamulaha dhismaha, ardaygu kama qayb geli karo Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 wakhti kasta inta lagu jiro wakhtiga eriska loo qoondeeyay.Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah inay bixiyaan kharashyada kal-fadhi kasta oo daryeel ah haddii ilmo laga eryo dugsiga iyo/ama Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91.

XEERKA ANSHAXA WAALID
Si loo hubiyo in Waxbarashada Bulshda One91 ay ilaaliso jawi wanaagsan oo caafimaad qaba, Xeerka Anshaxa wuxuu u dejiyaa shuruudo waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah laga filayo inay raacaan oo ay horumariyaan. Ujeeddadeennu waa in Waxbarashada Bulshda One91 loo metelo qaab wanaagsan markasta.
Waalidiinta/Dadka ardayda masuulka ka ah waxa ay iskula dhaqmi doonaan qaab matalaya afarta qiyam ee asaasiga ah: Daryeel
Daacadnimo
Ixtiraam
Mas'uuliyad:

Waalidiinta/Dadka ardayda masuulka ka ah kama qaadi karaan sawiro/fiidyow kaqeybgalayaasha kale barnaamijyada Waxbarshada Bulshada ee One91.

## Tusaalooyinka Dabeecadda loo Arko in ay tahay Waxyeello ama aanay Habboonayn

- Dabeecadaha si toos ah ama si dadbanba ugu hanjabaya qofka xaquuqdiisa amni
- Dagaalka oo ah mid aflagaado ah ama jirdil ah
- Xadgudub afka ah sida cayda, dacaayada waxyeellada leh, iyo luqad aan ixtiraam lahayn nooc kasta oo ay tahay
- Taabasho aan habooneyn oo lagula kaco jirka ama alaabta qofka

- Hadalka hanjabaada ee hubka
- Daroogooyinka, khamriga, tubaakada ama hubka lagu isticmaalo ama loo soo qaadato hareeraha dhismaha
- Dhaqanka ka hor istaaga shaqaalaha in ay fuliyaan awooddooda si ay diyaar ugu noqdaan dhammaan carruurta
- Ka bixida koox adiga oo aan haysan ogolaansho
- Carqaladeynta joogtada ah ee daryeelka caadiga ah ee carruurta kale
- Qaylada khatar gelinaysa kuwa kale
- Dabeecadaha carqaladeeya howlaha iyo/ama kaqeybgalayaasha barnaamijka
- Burburin hantiyeed
- Xushmad darro cad ama diidmo buuxda in la raaco hoggaanka shaqaalaha mas'uulka ka ah

## CAQABADAHA IYO CEYRINTA

CAWAAQIBTA DHAQANADA WAXYEELLADA LEH AMA AAN HABBOONAYN
Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay xaq u leedahay inay joojiso adeegyada daryeelka cunugga marka cunuggu muujiyo dhaqan soo noqnoqda, oo aan la aqbali karin. Shaqaalaha Waxbarashada Bulshada ayaa qaabeyn doona oo hirgelin doona xeeladaha xallinta khilaafaadka iyo farsamooyinka dib u jihaynta. Akhlaaqda aan habooneyn ee sii socota waxa ay keeneysaa cawaaqib xumo.

### Ka Caydhinta Barnaamijka

Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay uga baahan kartaa waalid in uu ka saaro ilmahooda barnaamijka haddii

- Waalidku wuu diido inuu raaco siyaasadaha Waxbarashada Bulshada One91 ee ku qeexan buug-gacmeedka iyo heshiiska adeegyada ee uu saxeexay waalidku
- Cunnugu ma awoodo inuu la qabsado Siyaasada Anshaxa ee Waxabarashada Bulshada One91
- Ku guuldaraysiga bixinta lacagaha adeegyada daryeelka ilmaha
- Shan ama in kabadan warbixinada akhlaaqda

- ❏ Warbixinta 1aad = Digniin iyo Ogeysiinta Waalidka
- ❏ Warbixinta 2aad = wargelinta waalidka iyo ogeysiiska in ilmaha lagu soo doono saacad gudaheeda.
- ❏ Warbixinta 3aad = Wargelinta waalidka, soo doon cannuga saacad gudahood iyo 1-maalin oo eris ah
- ❏ Warbixinta 4aad = Wargelinta waalidka, soo doon canugga saacad gudahood iyo 3-maalin oo eris ah
- ❏ Warbixinta 5aad = Ka Caydhinta Barnaamijka

Iyada oo ay ku xidhan tahay darnaanta dhacdada anshaxa, shaqaaluhu way ka boodi karaan habka nidaamka kala horreynta ee anshax marinta waxa ayna isla markiiba ka caydhin karaan cunugga barnaamijka.

# SIYAASADAHA iyo NIDAAMYADA CAAFIMAADKA & BEDQABKA

MN DHE /KA TIRSAN XARUMAHA (LA Cadeeyay)
Siyaasadaha soo socda ayay u baahan tahay Waaxda Shaqaalaha Minnesote (afka qalaad loo soo gaabiyo MN DHR) ama Xarumaha Caafimadka (ee leh Ruqsad) si Loo Saaro carruurta jiran iyo xakameynta cudurrada faafa.
SIYAASADDA SAARISTA

- o Xaruntu waxa ay kormeeri doontaa oo ka faquuqi doontaa cunug carruurta kale ee barnaamijka marka cunuggu jiran yahay isla markaana la socodsiin doonta waalidka cunugga jiran ama ilaaliyaha sharciga ah.
- o Xarunta ayaa soo saari doonta ama siin doonta ogeysiis waalidka ama ilaaliyaha sharciga ah ee cunugga laga helay cudurka isla maalinta barnaamijka lagu wargeliyo cudurka la is qaadsiiyo ee ay tahay in laga soo sheego sida ku qeexan Xeerarka Minnesota, qeybta 4605.7040, ama isnadaamiska, finan, cambaarta, ama hablo-baas.

SIYAASADHA DILLAACA CUDURADA FAAFA

- o Marka cunuggu xanuunsado, xarunta ayaa isla markiiba la socodsiin doonta cunugga xanuunsanaya waalidkiisa ama ilaaliyaha sharciga waxa ayna u qabanqaabin doontaa soo qaadid. cunnugu waxa uu u baahan yahay in la karantiimeeyo si looga hortago faafida cudurka.
- o Marka laga soocayo cunnugu xannuunsanaya carruurta kale ee barnaamijka taas micnaheedu maahan in cunnuga ay tahay in uu ku jiro meel gaar ah. Waxa ay macnaheedu tahay in cunnugu aanu si firfircoon uga qayb qaadan doonin waxqabyada carruurta kale inta uu sugayo in la soo qaado.

SIYAASADA WARGELINTA WAALIDKA
Xaruntu waxa ay ku wargelin doontaa waalidiinta u bandhiganka iyada oo ku dhajinaysa macluumaadka cudurka la is qaadsiin karo meel muuqata oo ay ka mid yihiin jirrada, calaamadaha, daaweynta, tallaabooyinka ka hortagga, iyo inta kiis ee la soo sheegay

# NIDAAMYADA XAALADDA DEGDEGGA

XAALADDA DEGDEGGA EE NAF-BADBAADINTA
Haddii daryeel caafimaad oo degdeg ah loo baahdo, shaqaalaha Waxbarashada Bulshada ayaa wici doona 911 ka dibna waalidka. Marka shaqaalaha caafimaadku ay yimaadaan, waxa ay go'aansan doonaan tallaabada habboon. Haddii daaweyn degdeg ah loo baahdo, carruurta waxaa loo qaadi karaa xarunta caafimaadka ee ugu dhow. Waalidka ayaa mas'uul ka noqon doona dhammaan kharashyada caafimaad.
*Shaqaalaha Waxbarashada Bulshada looma oggola inay carruurta ku qaadaan baabuurtooda sabab kasta ha noqotee. Adeegyada Caafimaadka Degmada lama heli karo inta lagu jiro saacadaha barnaamijka Waxbarashada Bulshada ama safarada dibadda*

DHAAWACYADA FUDUD
Shaqaalaha Waxbarashada Bulshada ee la aqoonsan yahay ayaa maamuli doona gargaarka degdegga ah.

Waalidiinta ayaa la ogeysiin doonaa marka ay sii qaadayaan.

DHAAWACYADA CULUS

Dhaawacyada u baahan dhakhtarka, waalidiinta waxaa lagu wargelin doonaa inay u yimaadan oo soo qaadan cunnuga goor hore waxa ayna mas'uul ka noqon doonaan inay ilmahooda u qaadaan goob caafimaad.

Shaqaalaha Waxbarashada Bulshada ayaa maamuli doona gargaarka degdegga ah waxa ayna ku dadaali doonaan sidii cunuggu aanu u dareemi lahayn werwer ilaa qof kale yimaado.

## CALAAMADAHA CUDURKA

Caruurta jirani ma xaadiri karaan barnaamijyada Waxbarshada Bulshada ee Degmada 191. Waa lagula soo xiriiri doonaa si aad u soo qaadid ilmahaaga haddii ay leeyihiin mid ka mid ah calaamadaha soo socda

- Xumad 100 darajo ah ama ka sareysa
- Dheecaanka indhaha
- Duuf badan
- Matag
- Finan aan la aqoon

Si loo caawiyo yareynta faafitaanka suurtagalka ah ee COVID-19, Degmada 191

- Waajib ayay ka dhigaysaa in ay xidhaan af-saab shaqaalaha iyo ardayda inta ay dugsiga ku jiraan
- Waxa ay si buuxda u raacda kala fogaanshiyaha jidheed ee dadku
- Waxay xoojineysaa gacmo-dhaqashada oo waxay siisaa gacmo nadiifiye
- Yareeysa booqdayaasha dugsiyada
- Kor u qaadaa nadiifinta iyo fayodhowrka dhismayaasha dugsiga

Carruurtu waxa ay u baahan yihiin in ay xumad ama calaamad ka madax-bannaan yihiin 24 saacadood ka hor inta aysan ku soo noqon Barnaamijka.

Haddii carruurtu uga maqnaadaan dugsiga xanuun sahlan, ma xaadiri karaan barnaamijyada Waxbarashada Bulshada ee maalintaas.

Waalidiinta waxaa looga baahan yahay inay ogeysiiyaan Isuduwaha Goobta haddii ilmahoodu uu ku dhaco cudur la is qaadsiiyo ama faafa.

Shaqaalaha Waxbarashada Bulshada ayaa soo diri doona ogeysiis caafimaad si ay ugu wargeliyaan qoysaska haddii carruurta kale u bandhigmaan cudurka.

## DAAWADA

SIYAASADAHA DAAWO SIINTA

- ❖ Ogolaansho qoraal ah ayaa laga heli doonaan waalidka ilmaha ama masuulka sharciga ah ka hor inta aan la siin daawada dhakhtarku u qoray, kareemka qorraxda, iyo dawada ka hortagga cayayaanka.
- ❖ Dawooyinka aan qoritaanka lahayn, kareemka qorraxda, iyo dawada ka hortagga cayayaanka ayaa la siin doona iyada oo la raacayo tilmaamaha soo-saaraha ilaa ay

bixiyaan tilmaamo qoraal ah oo ka imanaya xirfadle caafimaad oo muujinaya inuu u isticmaalo shayga si duwan

DAAWOOYINKA

- ❖ Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka dhigaan waqtiyada daawada la siinayo cunnuga marka uu guriga jooga inta suurtagal ah.
- ❖ Waalidiintu waa in ay had iyo jeer siiyaan daawada ugu horreysa si ay shakhsi ahaan u eegaan falcelinta ilmaha.
- ❖ Daawooyinka la qoro iyo kuwa la iska iibsado ayaa la siin doonaa oo keliya ilmaha marka laga helo oggolaansho qoraal ah waalidka ama ilaaliyaha.
- ❖ Oggolaansho qoraal ah oo dhakhtar ka yimi ayaa loo baahan yahay dhammaan daawooyinka u baahan in la qaato in ka badan 10 maalmood.
- ❖ Waalidiintu waa inay keenaan daawooyinka oo ku jira dhalada asalka ah oo ay buuxiyaan foomka daawada oo laga heli karo goobta Barnaamijkaaga.

## XASAASIYADA

SIYAASADAHA KA HORTAGGA IYO KA JAWAABIDDA XASAASIYADA

Xaruntu waxa ay u baahan doontaa taas ka hor inta aan lagu soo darin cunug daryeelka, xarunta waa inay ka heshaa dukumiintiga xasaasiyad kasta oo la og yahay waalidka ilmaha ama ilaaliyaha sharciga.
Xaruntu waxa ay ku haysaa macluumaadka xasaasiyadda ee hadda jirta diiwaanka ilmo kasta.

Macluumaadka xasaasiyadda waa inay ku jiraan

- ❖ Tilmaanta xasaasiyadda, waxyaabaha kiciya ee gaarka ah, farsamooyinka ka-hortagga, iyo calaamadaha falcelinta xasaasiyadda.
- ❖ Nidaamyada looga jawaabayo falcelinta xasaasiyadda, oo ay ku jiraan daawooyinka, inta la qaadanyo, iyo macluumaadka xiriirka dhaqtarka.
- ❖ Xaruntu waxa ay ku wargelin doontaa shaqaalaha macluumaadka xasaasiyadda hadda jirta ee ilmo kasta. Ugu yaraan si sannadle ah iyo marka isbeddel lagu sameeyo macluumaadka la xiriira xasaasiyadda ku jirta diiwaanka ilmaha, xarunta rukhsada leh waa in ay ku wargelisaa shaqaalaha isbeddel kasta.

# XIRITAANKA DUGSIGA iyo CIMILADA XUN

Barnaamijyada badankood waxa ay isku dayi doonaan inay ku raaxaystaan banaanka maalin kasta.
Si kastaba ha noqotee, marka heerkulku ka hooseeyo derajada eber (oo leh qabow dabayl), shaqaalaha iyo carruurtu waxa ay ku jiri doonaan gudaha dhismaha.
Fadlan hubi inuu ilmahaagu yimaado isagoo diyaarsan oo wata qalabka jiilaalka ee ku habboon inuu maalin kasta ku ciyaaro bannaanka.
Carruurtu waa inay soo qaataan: kabo, sharaabaado diiran, gacmo gashiyo, koofiyado, jaakado iyo surwaalka barafka.

Tixraaca kuleylka ee 90 darajo ama ka sareeya waxa ay leedahay khatar caafimaad oo aad u weyn (Adeegga Cimilada Qaranka). Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 waxa ay si taxaddar leh ula socdaan cimilada (xagaaga iyo jiilaalka) waxa ayna u diyaariyaan waxqabyada banaanka si ku habboon cimilada. Inta lagu jiro bilaha xagaaga ee qiyaasta kuleylku sarreeyo, waxqabyada banaanka waxa ay ku egyihiin subaxa hore. Nidaamyadeenna waxaa ka mid ah isticmaalka muraayadaha qorraxda, biyo-cabis sax ah oo jootana ah iyo noocyada waxqabadyada aan ka qaybqaadan doonno waxa ay ku xirnaan doonta cimilada.

## MAALINTA BARAFKA

Haddii dugsiyada Degmada 191 loo xidho maalinta oo dhan cimilada oo xun awgeed, barnaamijyada Waxbarshada Bulshadu sidoo kale waa la xidhi doonaa. Ogeysiiska qadin ah ayaa lagu bixin doonaa degelka shabakada, isd191.org, iyo School Reach.
Xarumaha telefishanka WCCO 4 (830am radio), KSTP 5, KMSP 9 iyo KARE 11 waa inay sheegan xirnaanshiyaha dugsi sidoo kale.

## FASAXAADAHA HORRE LOO SOO DHIGO

Marka dugsigu la xidho iyada oo lagu jiro maalinta dhexdeeda, cimilada oo xun awgeed dhammaan barnaamijyada dugsiga kadib waa la xiri doonaa oo ay ku jiraan barnaamijyada

daryeelka ilmaha. Waa muhiim inaad qoyskaaga kala hadasho dhacdadan oo aad qorshe u dejiso si aad u hesho daryeel kale.
Dhamaan joojinta la sameeyay ka dib marka dugsiga la bilaabo waa in lagu dhajiyaa deggelka degmada iyo sidoo kale deggelada ku taxan boggan.
Waxa ay u badan tahay in shaqaalaha Barnaamijka ay ka maqnaan doonaan dhismaha goorta ama haddii dugsiga la joojiyo iyada oo lagu jiro maalinta dhexdeeda. Macallimiinta fasalku waa inay ardayda u sii daayaan waalidiinta, basaska, ama inay guriga u lugeeyaan. Macallimiintu uma diri doonaan carruurta Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91.

DAAHIDA LABA SAACADOOD
Haddii ay dhacdo in waqtiga bilowga dugsigu uu dib u dhaco laba saacadood cimilada oo aad u xun awgeed,
Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee Waxbarashada Bulshada One91 ayaa la daahiyaa laba saacadood inta lagu jiro maalmaha waxbarashada fog ama la xirayo ka hor daryeelka dugsiga.

DUGSIGA KADIB
Waxa aan ku dhiiri galineynaa waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah inay dhageystaan warbixinada cimilada inta lagu jiro la talinta cimilada ama digniinta. Fadlan qorshee in qof yimaado goobta daryeelka carruurta ugu dambayn 5:30 galabnimo